

## **Aqbaar ku saabsan caabuqa corono 2019-nCov**

Illa yo deseember 2019 waxaa qaybió ka mid dunida ku sii fidayay caabuqa corono. Cudurkana fayruska sababay waxaa loo bixiyay covid19. Badanaa waxaana lagu qaadi karaa si fudud, asagoo ku hakada / ku joogsada neef mareenka, laakiin dad qaar ayuu si khatar ah u haleelaa sida caabuqa ku dhaca sambabada. Fayraskaan waxaa lagu kala qaadaa adigoo xidhiidh la sameeyay qof qaba cudurka/xannuunka, amase aad u dhawyad kolka uu hindisayo ama qufacayo taasina ay tahay in uu sidaa cudurka ku faafo. Waxaad khatar ugu jirtaa in lagu qabadsiiyo cudurka haddii ay tagtay meel uu cduruka ku faafo amase aad la kulantay/xidhiidhay qof cudurka qaba caabuqa corono.

Hay'adaha dowlada iswiidhan waxay dadka kula talinayaan dadka qaba calaamadaha sida qofka qaba cuduradda neef mareenka, xitaa haddii ay fududahay, ka fagoow xidhiidhka dadka ama bulshada aysan khatar kuugu noqon in la qabadsiiyo. Waxaa muhiim haddii aad dareemaysid xannuun sida calaamadaha duuf, qufac amase qandho / xumad ka fogoow inaad la kulanto dadka. Ha aadin shaqada, iskuulka amase dugisga xannanaanada & barbaarinta carruurta. Xitaa aad dareemaysid xannuun fudud/ yar. Taasina waa muhiin in aysan khatar kugu noqon in lagu qabadsiiyo / laguugu daarto xannuunka.

Tallaabooyinka looga hortegi karo

Mar walina waa inaad ku dadaashaa nadaafadaada si aysan khatar u noqon in lagu qabadsiiyo cudurka. Waana inaad raacdaa tallooyinka looga hor tego taasoo yaran karta amase ka hor tegi karta inuu cudurka sii faafo.

- Haddii qufacaysid amase aad hindisaysid isticmaal laabka gacanta.
- Ku dhaq gacmahaaga biyo & sabuun
- Isticmaal aalkolada loogu tala galay in lagu dhaqo gacmaha ( hanssprit)
- Ka fgoow inaad la kulnato ama aad la xidhiidho qof looga shakisan yahay in uu qabo cudurka .

Wixii intaa faahfaahin dheer waxaad kala socon kartaa websiteka hoos ku qoran luuqado kala duwan.

Länk till mer information på Vårdguiden på fler språk:

<https://www.1177.se/other-languages/1177-varldguiden-pa-flera-sprak/>